Barnaamijka Talagelinta Bulshada ee Daadihiye

# WARGELINTA BILLAHA

Sebteembar 2023

Ku soo dhawaada Wargelinta Daadihiye ee bisha Sebteembar. Waxaan markale dib-u-bilownay cutub xiiso leh oo ka mid noqan doona taxanihii wargelinta Daadihiye ee billaha ahaa, waxaana sharaf inoo ah in aan bulshada la wadaagno natiijooyin ka soo baxay wareysiyo aan la yeelannay 2609 qof oo Muqdisho ku sugan. Ka RAAGSAN ahaan, waxa aan u heellannahay in aan kor u qaadno codka muwaadiniinta, isla markaana aan fursad u siino qaabaynta go'aammada annagoo adeegsanayna hindisaha talagelinta bulshada ee Daadihiye. Madasha Daadihiye waxa ay astaan u tahay isku xirka bulshada iyo maamulka deegaanka, waxa ayna door muhiim ah ka qaadan kartaa qaabaynta adeegyada mudnaanta u leh bulshada.

Cadadka 4aad daabacaddaan ee Daadihiye, waxaan ku iftiiminnay bixinta adeegyada muhiimka ah ee Muqdisho laga heli karo, waxaanna u kuur galnay waxyaabaha saamaynta wayn ku leh awoodda dadwaynaha ay ku heli karaan adeegyada ay u baahan yihiin annaga oo si qoto dheer u eegeyna Qiimaha, Helitaanka, iyo Tayada adeegyada kala duwan ee daruuriga ah, waxaanna doonaynaa inaan dulmar guud ku sameyno heerka adeeg bixinta ee magaalada Muqdisho.

Daadihiye waxa uu faallo waafi ah ka bixinayaa heerka bixinta adeegyada muhiimka ah ee Muqdisho waxaanna soo jeedinaynaa talooyin ku wajahan siyaasad-dejiyayaasha iyo howlwadeennada si ay qeyb uga noqoto dadaallada lagu horumariyo adeegyadan .

Waxaad booqan kartaa boggeena www.daadihiye.so si aad isku diiwangeliso oo aad ula socoto cadadyada soo socda ee Wargelinta Billaha Daadihiye. Waxaan had iyo jeer soo dhawaynaynaa jawaab celin walba oo ka timaadda dadweynaha iyo siyaasad-dejiyeyaasha. Haddii ay jiraan warbixinno, faallo iyo falcelin aad doonaysid in aad nala wadaagto, waxa aad noogu soo gudbin kartaa cinwaankeenna daadihiye@raagsan.com.

Ifafaale Wacan,
Badra Yuusuf
Maamulaha Shirkadda Raagsan




## NATIIJOOYINKA SAHANKA

## NUXURKA NATIIJOOYINKA

Wargalintan waxaan kusoo gudbinaynaa filashada dadwaynaha Muqdisho ee ku aadan adeegyada aasaasiga ah iyo sida dowladdu u horumarin karto helitaanka iyo tayada adeegyada.

### Qiimaynta adeegyada muhiimka ah ee magaalada Muqdisho marka laga eego dhanka qiimaha, helitaanka iyo tayada.


Iyadoo ay sii kordhayaan tirada dadwaynaha iyo baahida ay u qabaan adeegyada daruuriga ah, waxaa lagama maarmaan ah in la fahmo caqabadaha dadwaynaha magaalada Muqdisho ay kala kulmaan helitaanka adeegyadaan. Falanqeyn qoto dheer kadib, Daadihiye waxa uu diiradda saarayaa shan waaxood oo muhiim ah, oo kala ah: biyaha, korontada caafimaadka, waxbarashada, cadaalada iyo nidaamka garsoorka. Daraasaddu waxay qodobadaan kor ku xusan ka qiimaysay saddex dhinac oo muhiim ah, oo kala ah dhanka qiimaha adeegga, helitaanka adeegga, iyo tayada adeegga. Falanqayntaan ayaa iftiiminaysa dhibaatooyinka ay kala kulmaan muwaadiniintu helitaanka adeegyadaan muhiimka ah. Waxa ay ujeedadeenu tahay in siyaasad-dejiyeyaasha lagu kaabo aragtiyo iyo fikrada muhiim ah si ay u hagaan talagalinta bulshada una hagaajiyan bixinta adeegyada muhiimka ah ee dadweynahu u baahan yihiin. Annagoo eegeyna xiriirka ka dhaxeeya qiimaha adeegyada, helitaanka iyo tayadooda, waxaan rajayneynaa inaan aragtiyo muhiim ah ku biirino dadaallada guud ee lagu horumarinayo bixinta adeegyada muhiimka ah si ay dadwaynaha magaalada Muqdisho ku dhaqan ooga faaidasytaan.

Shaxda 1: Tirada dadka deegaanka ee ka warbixinaya aragtida adeeg bixinta

| Adeegyada | Qiimeyn | | Hoose | Dhexe | Sare |
|---|---|---|---|---|---|
| Biyaha | Qiimaha | | 7% (163) | 52% (1133) | 41% (896) |
| | Helitaanka | | 8% (145) | 80% (1548) | 12% (229) |
| | Tayada | | 40% (867) | 52% (1133) | 9% (192) |
| Daryeelka caafimaad | Qiimaha | | 9% (203) | 40% (868) | 51% (1121) |
| | Helitaanka | | 27% (597) | 62% (1346) | 11% (249) |
| | Tayada | | 48% (1050) | 43% (934) | 9% (208) |
| Waxbarashada | Qiimaha | | 11% (251) | 54% (1175) | 35% (766) |
| | Helitaanka | | 20% (449) | 69% (1504) | 11% (239) |
| | Tayada | | 41% (903) | 49% 1078 | 10% (211) |
| Cadaaladda iyo nidaamka garsoorka | Qiimaha | | 17% (311) | 31% (587) | 52% (963) |
| | Helitaanka | | 45% (837) | 42% (785) | 13% (239) |
| | Tayada | | 60% (1119) | 30% (567) | 10% (175) |
| Korontada | Qiimaha | | 9% (194) | 44% (977) | 47% (1021) |
| | Helitaanka | | 21% (452) | 67% (1477) | 12% (263) |
| | Tayada | | 34% (747) | 54% (1173) | 12% (272) |

## ADEEGGA BIYAHA

Goobaha laga heli karo biyo nadiif ah ee Soomaaliya ayaa xaddidan. Labaatankii sano ee la soo dhaafay, abaaro isdaba joog ah ayaa sababay biyo la'aan soo wajahday dadyowga ku dhaqan miyiga iyo magaalooyinka, taas oo kicisay tartan iyo colaado ka dhashay helitaanka biyaha, waxaana ka dhashay colaadahaas in dad badan ay barakacaan.




Qayb kamid ah dadka la soo wareystay ayaa 81% (1548) muujiyay walaac ku saabsan in aan la awoodi karin helitaanka biyo nadiif ah, waxaana "dhexdhexaad" lagu qiimeeyey heerka helitaanka adeeg biyo.Si kastaba ha ahaatee, dadka deegaanka ayaa walaac ka qabay tayada biyaha la siinayo/heli karaan.

Dadka bixiyay xog dheeraad ah oo sheegay in biyaha galinta qaarkood ay soo maran bulaacadaha wasakhaysan, waxayna intaas ku dareen in ceelasha biyaha ee magaalada ay nadaafaddoodu liidato. Sidoo kale waxaa la iftiimiyay in qiimaha biyo nadiif ah lagu heli karo aysan ahayn mid dadku wada awoodi karo, iyadoo biyaha inta badan ay keenaan shirkado gaar loo leeyahay, taasina ay caqabad ku tahay nidaaminta helitaanka iyo qiimaha hoose.

"Waxaa jira caqabado badan, mid ka mid ahna waa helitaan la'aanta biyo nadiif ah." — Lab, Barakace, Cabdi Casiis.
“Caqabadda ay bulshadu la kulanto waa helitaanta biyaha, biyaha mar walba waa wasakh, waxaana dhibaato naga haysata bulaacadaha.” — Dheddig, Muhaajir-Dhaqaale, Wadajir.


## a) Xiriirka ka dhexeeya biyo-la'aanta iyo xadgudubka jinsiga ku salaysan

Haweenka iyo gabdhuhu waxay inta badan u dhaamiyan biyaha qoysaskooda waxayna soo qaadaan jirgaamo culus oo biyo ka buuxaan. Iyada oo kheyraadka biyuhu ay ku yar yihiin qaybo badan oo ka mid ah Soomaaliya, jawaab-bixiyeyaashu waxay xuseen in haweenku ay ku qasban yihiin in ay u safraan masaafo dheer si ay u helaan ilo biyood, taas oo khatar gelinaysa una horseedaysa rabshado iyo faraxumayn.

“Biyo la’aan ba’an ayaa halkan nagu haysa, waayo goobaha biyuhu way naga fog yihiin. Mararka qaarkood tuugo ayaa naga soo raacda waddooyinka, iyagoo isku dayaya inay na kufsadaan." — Dheddig, Barakace, Wadajir.
“Hadda waxaa aad noogu sii daran gaajada iyo weliba biyo la’aan ka jirta nawaaxigeenna, mararka qaar dumarka ayaa biyo u raadsada meelo fog’fog marna waxay la kulmaan tuugo kufsi u gaysta haweenka iyo gabdhaha iyo khatar kaleba” , — Dheddig, Barakace, Wadajir.

# DARYEELKA CAAFIMAADKA


Dagaaladii sokeeye oo socday muddo dheer waxaa kadhashay xasilooni darro iyo in uu meesha ka baxo nidaamka daryeelka caafimaad ee Soomaaliya, tasoo keentay in uu sii xumaanayo maalinba maalinta ka danbaysa, kana dhigaysa heerka adeegga caafimaadka mid ka mid ah kuwa ugu hooseeya adduunka. Hadda waxaa jira horumar yar markii la bar-bardhigo sanadihii la soo dhaafay, nidaamka caafimaadka Soomaaliya ayaa weli waxaa kajira welwel weyn. Sidaas waxaa sheegay 33% (872) dadka deggan gudaha Muqdisho.




“Caqabadda ugu weyn ee ka jirta xarumaha caafimaadka waa masaafada iyo in ay naga fog yihiin. Intaa waxaa dheer, ma jiraan isbitaallo horumarsan; haddii qof xanuunsado, waxay nagu qaadanaysaa waqti dheer in aan gayno isbitaallo." — Dheddig, Barakace, Heliwaa

# WAXBARASHADA

Nidaamka waxbarashada waxaa sidoo kale si weyn u saameeyeey dagaalladii sokeeye ee waqtiga dheer ka socday dalka. Goobaha tacliinta Soomaaliya ma haystaan agab ku filan, intaa waxaa u sii dheer aqoonta macallimiinta oo hooseysa iyo tayada waxbarashada oo liidata. Sidoo kale, heerarka isdiiwaangelinta ardayda ku soo biiraysa dugsiyada hoose ayaa ka hooseeysa tirada caadiga ah ee adduunka, iyadoo ku dhawaad saddexdii milyan oo ka mid ah shanta milyan ee carruurta iyo dhallinyarada ah aysan helin waxbarasho.[1] Ilaa 42% (1102) oo Muqdisho deggan kana mid ah dadka la wareystay ayaa ku raacay arrintan.





Xog aruurintaan ayaa sheegeysa in tayada waxbarashada oo liidata ay horseedi karto shaqo la’aan baahsan. Caqabadaha dhaqaale, sida kharashka waxbarashada ee aan la awoodi karin iyo fogaanshaha xarumaha waxbarashada, ayaa waxay ka hor istaagaan dhalinyarada inay ku biiraan waxbarashada. Iyadoo ay jirto baahi loo qabo waxbarasho tayo leh, haddana shaqsiyaad badan ayaan awoodin in ay iska bixiyaan waxbarasho tayo leh sababtuna tahay maciishada oo sarreysa iyo dakhligooda oo hooseya. Caqabadaha dhanka dhaqaalaha la xiriira ayaa si wayn u saameeya qoysaska marka ay la halgamayaan sidii ay carruurtooda ugu heli lahaayeen waxbarasho.

"Tayada waxbarashada oo hooseysa waxay ka hor istaageysaa qofka wax barta inuu helo meel uu ka shaqeeyo." — Dheddig, Dadka Deegaanka, Shibis.

[1] USAID Somalia. (2019). Somalia | U.S. Agency for International Development. https://www.usaid.gov/somalia/education

## CADAALADDA IYO ADEEGYADA SHARCIGA

Helitaanka cadaalad waa arrin adag Soomaaliya gudaheeda. Dadku in ay helaan adeeg garsoor oo si siman oo hufan u xalliya khilaafaadka dhexdooda waxaa caqabad ku ah arrimo badan oo ay ka mid yihiin kaabayaasha dhaqaalaha oo aan ku filnayn iyo agabka garsoorka oo xaddidan, sida xarumaha adeegga garsoorka iyo maxkamadaha, tirada xirfadlayasha sharciga oo yar oo misna aan laheyn tababar ku filan iyo nidaamka garsoorka dhaqanka oo weli aad looga dambeeyo. Intaa waxaa dheer, aqoon la'aanta muwaadiniinta ee dhinaca sharciyada iyo xuquuqdooda. Gaar ahaan reer miyiga, haweenka iyo barakacayaasha gudaha, waxa ay caqabad kala kumaan helitaanka caddaaladda.[2]





Dadka la wareystay, 53% (1379) waxay xuseen in helista adeegyada garsoorka ay hortaagan tahay 5 caqabadood oo ay la kulmaan bulshada ku dhaqan Muqdisho. Bulshada oo nidaamka garsoorka Soomaaliya u aragta in uu yahay mid aan cadaalad ahayn oo aan la isku halayn karin. Sidoo kale maxkamadaha ay yihiin kuwo musuq maasuq dhex dabaalanaya. Waxaa ay xuseen in garsoorku ku dhisan yahay siyaasada qabiilka ayna adag tahay in dadka la hayb sooco helaan caddaalad maadaama ay dhici karto in si caddaalad darro ah loo la dhaqmo qabiilka ay ka soo jeedaan awgiis.

"Helitaanka caddaaladdu aad ayuu u hooseeyaa, inta badan bulshadu ma hesho caddaalad." — Dheddig, Barakace, Kaxda.
“Way adag tahay in aan caddaalad helno, maxaa yeelay dadku qabiil ayay ku dhaqmaan, markay dawladda u gudbiyaan dacwadooda, waxba uma qabtaan.” — Dheddig, Dadka Deegaanka, Xamarweyne.
"Waxaan la kulanaa cadaalad darro, maxkamaduhuna waa kuwo aan la isku halleyn karin oo aad u musuqmaasuq badan." — Dheddig, Dadka Deegaanka, Hodan.
"Inta badan maxkamadaha waa la musuq-maasuqay, dadkuna waxay dhibaato ku qabaan helitaanka caddaalad/adeegga garsoor ee degmada." — Dheddig, Barakace, Warta Nabadda

[2] Safer World. (2019). The missing link: Access to justice and community security in Somalia. Safer World, August.

## KORONTADA

Dad gaaraya 9 milyan oo kamid ah 15ka milyan ee dadweynaha Soomaaliyed, ayaan heli karin adeeg koronto, iyadoo qiimaha korontadu yahay mid kamid ah kuwa aduunka ugu sareeya mana jiraan shirkado ay dowladdu leedahay oo u xilsaaran bixinta adeedyada korontada. Adeegyadan waxaa bixiya tobanaan shirkadood oo yaryar oo si gaar ah loo leeyahay, masuulna ka ah bixinta adeegyada korontadda, maadaama aysan jirin shuruuc dowladeed oo haga bixinta korontada. Tani waxay keentay in ay qiimaha korontadu sare u kacdo, iyadoo Kiilowaatku uu ku kacayo illaa $1 saacadii.[4].




Marka la eego xog-ururintii Daadihiye ka sameeyey bulshada, 38% (1000) jawaab-bixiyeyaasha ayaa sheegay in korontadu ku jirto 5 arrimood ee ugu waawayn ee bulshada haysta. Dadka la waraystay ayaa isku raacay in ay la daala-dhacayaan bixinta biilasha korontada oo la sheegay in ay aad u badan tahay, iyadoo qaar badana aysan awoodin in ay helaan koronto. Arrintan ayaa loo aaneynayaa la’aanta kaabeyaasha dhaqaalaha iyo maalgashiga ganacsiga korontada Soomaaliya, taasoo keentay in aysan dad badan helin koronto ku filan oo saameyn ku yeelanaysa tayada guud ee nolosha iyo horumarka dhaqaalaha dalka.

“Kor u kaca maciishada waa mid ka mid ah dhibaatooyinka haysta shacabka Muqdisho. Ma awoodno inaan iibsano cunto qaali ah, kiro, iyo koronto aad u sarreeya iska bixino. — Lab, Muhaajir-dhaqaale, Shibis.
"Korontada waa caqabadda ugu weyn sababtoo ah qiimaheedu waa sarreeyaa." — Lab, Dadka Deegaanka, Xamar Jajab.
"Iskama bixin karno koronto." — Dheddig, Barakace, Kaxda



[3] World Bank Group. (2021). A $150 Million Electricity Recovery Project Aims to Help Light up Somalia. The World Bank.
[4] Harris, M. (2022). Powering ahead. Materials World.

## SAAMAYNTA NATIIJOOYINKAN

Natiijooyinka cilmi-baaristaan waxay si weyn noo xasuusinayaan caqabadaha ay la kulmaan dadwaynaha Muqdisho kuwaas oo ku aadan helitanka adeegyada muhiimka ah iyo horumarkooda. Natiijooyinkani waxay hoosta ka xariiqayaan baahida degdegga ee loo qabo siyaasad lagu dhammaystiro maalgashiyada istiraatiijiga ah ee qaybaha adeegyada ugu muhiimsan, kuwaas oo kala ah adeegga biyaha, daryeelka caafimaadka, waxbarashada, caddaaladda iyo adeegyada garsoorka, iyo korontada. Siyaasad-dejiyeyaasha, hay'adaha dowladda, ururrada caalamiga ah, iyo kooxaha bulshada rayidka ah waa in ay si wadajir ah oo daah-furan uga wada-hadlaan arrimahan la xiriira hormarinta adeegyada ay bulshadu u baahantahay.

Si kor loogu qaado badqabka iyo heerarka nolosha bulshada Soomaaliyeed ee ku dhaqan miyiga iyo magaalooyinka, waxaa muhiim ah in laga qaybgaliyo bulshada deegaanka qorshaynta iyo hirgelinta siyaasadaha ee muhiim ka u ah horumar waara. Waa in la hubiyaa sidii loo hirgelin lahaa maalgelin ku filan iyo qoondaynta kheyraadka oo hufan iyo helitaanka adeeggyada loo itaal daran yahay. Iyadoo wax laga qabanayo caqabadaha hortaagan helitaanka adeegyada muhiimka ah, daneeyayaashu Soomaaliya waxay sameyn karaan horumarro la taaban karo oo lagu hagaajinayo tayada nolosha ee dadwaynaha magalaada Muqdisho. Dowladda iyo hay'adaha ay khuseyso waa inay u gogol xaaraan mustaqbal barwaaqo oo ay u siman yihiin bulshada Soomaaliyeed oo dhan iyada oo loo marayo adaalo ku dhisan iskaashi iyo hindisayaal istaraatiijiyadeed.

## TALO-BIXIN

Si kor loogu qaado helitaanka , tayada, iyo gaarsiinta adeegyada muhiimka ah ee bulshooyinka Soomaaliya, waxaan ku soo jeedinaynaa in la fuliyo talooyinka soo socda oo dhameystiran.

### Hagaajinta Kaabayaasha Biyaha

Si loo hubiyo in dadka deggaanku ay helaan biyo nadiif ah oo ku filan waa in la cusboonaysiiyo kaabayaasha biyaha, oo ay ku jiraan nidaamyada bullaacadaha iyo tas-hiilaadka fayadhowrka. Tani waxay gacan ka gaysan doontaa ka hortagga cudurrada biyaha ka dhasha waxayna dammaanad qaadaysaa in uu helo qof kasta oo bulshada ka mid ahi biyo nadiif ah.

### Xoojinta Adeegga Caafimaadka

Tan waxa lagu gaari karaa in la kordhiyo maalgashiga nidaamka daryeelka caafimaadka dadweynaha si loo horumariyo adeegyada daryeelka caafimaadka oo lagu helin karo qiimo jaban iyo tayo sare, gaar ahaan deegaanada miyiga ah. Intaa waxaa dheer, dhisida isbitaalo badan iyo rugaha caafimaadka, shaqaaleysiinta xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, iyo bixinta qalabka caafimaadka ee muhiimka ah waana in la hubiyaa helitaanka daryeelka caafimaadka iyo bedqabka muwaadiniinta.

### Kobcinta Tayada Waxbarashada

Horumarinta hindisayaasha lagu horumarinayo helitaanka waxbarashada, gaar ahaan miyiga, iyada oo la dhisayo dugsiyada, laguna bixinayo taageero dhaqaale iyada oo loo marayo deeqo waxbarasho iyo kaalmooyin caalami ah, shaqaaleysiin iyo tababarida macalimiin tayo leh, iyo cusboonaysiinta manhajka iyo hababka wax-barida waxay sahlaysa helidda iyo horumarinta tayada waxbarashada carruurta Soomaaliyeed.

### Xoojinta Nidaamka Garsoorka

Horumarinta kaabayaasha sharciga iyada oo la abuurayo xarumo badan oo garsoorka iyo xarumo maxkamadeed, gaar ahaan meelaha fogfog, iyo samaynta olole wacyigelin ah oo lagu barayo muwaadiniinta, gaar ahaan kuwa la haybsooco, waxyaabaha dastuurka uu xuquuqda u siiyay, taasina waxay wanaajin kartaa helitaanka adeegyada sharciga. Intaa waxaa dheer, wax ka qabashada musuqmaasuqa iyo yaraynta saamaynta siyaasadda qabiilka, taasina waxay ka dhigi kartaa nidaamka garsoorka mid loo siman yahay oo aan eex lahayn.

### Horumarinta Kaabayaasha korontada ee Joogta ah

Horumarinta kaabayaal tamar oo waara la iskuna hallayn karo, oo ay ku jiraan ilaha kala duwan tamarta, fidinta adeegga korantada, iyo hirgelinta xeerarka iyo siyaasadaha kor loogu qaadayo tartanka iyo maalgashiga, waxay xaqiijin doontaa in la helo adeeg koronto oo qiime-jaban lana awoodi karo. Intaa waxaa dheer, dhiirigelinta isticmaalka ilaha tamarta ee la cusboonaysiin karo waxay yaraynaysaa dikhowga waxayna tamarta ka dhigi doontaa mid la awoodi karo deegaankana ku habboon..

## CADDADKA SOO SOCDA

Caddadka soo socda ee wargelinta Daadihiye, waxaan ku shaacin doonnaa sida baramaamijkaan talagalinta ah ee Daadihiye ugu guulaystay sara u qaadidda xiriirka bulshada Soomaaliyeed. Daabacaadani waxay iftiimin doontaa hababkeena cusub iyo xeeladaha noo suurtageliyay inaan saameyn ku yeelano mashaariic kala duwan si macno leh.

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH, FADLAN BOOQO**

www.daadihiye.com

www.daadihiye.so

**Nagala soo xiriir:** daadihiye@raagsan.com

Nagala soco:
daadihiye_so

Naga soo wac
2224